

OGOW XUQUUQDAADA



Maadaama aad tahay codeeye ah reer Minnesota, waxaad leedahay xuquuq badan—ogow xuquuqdaadu waxa ay tahay!

FASAX KA QAADO SHAQADA SI AAD U SOO CODAYSO

Waxa aad xaq u leedahay in aad shaqada fasax ka qaadato wakhti kasta inta lagu jiro muddada codaynta maqnaanshaha ama Maalinta Doorashada si aad u soo codayso, adiga oo aan waayanin mushaharkaaga, fasaxaaga shakhsi ahaaneed, ama wakhtiga fasaxa.

IN AAD CODAYSID HADDII AAD SAFKA KU JIRTID 8DA FIIDNIMO.

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad safka ku jirtid waqti kasta oo ka horeeya 8da fiidnimo.

IN AAD ISDIIWAANGELISID MAALINTA DOORASHADA

Waxaad xaq u leedahay in Maalinta Doorashada aad isdiiwaangelisid si aad u codaysid haddii aad muujin kartid caddaynta loo baahan yahay ee deegaanka.

IN AAD HADAL KU SAXIIXDID

Waxaad xaq u leedahay in aad hadal ku caddaysid qofka aad tahay oo aad qof kale waydiisato in uu adiga kuu saxiixo haddii magacaaga aadan wax ku saxiixi karin.

IN AAD CAAWIMAAD WAYDIISATID

Waxaad xaq u leedahay inaad caawimo qofkasta weydiisato, marka laga reebo wakiilka loo shaqeeyahaaga ama ururkaaga shaqaalaha.

IN AAD GOOBTA CODBIXINTA CARUUR KEENI KARTID

Waxaad xaq u leedahay in aad caruurtaada keento si ay kuula codeeyaan.

TAARIIKHAHA 2026

DOORASHADA AASAASIGA

Talaada, 11ka Bisha 8aad
(August)

MAQNAANSO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 18ka Bisha 9aad (September) ilaa 2da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Hory isdiiwaangeli ugu dambayn 13ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA

Talaada, 3da Bisha 11aad
(November)

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnnvotes.gov • 1-877-600-VOTE

...ka timid horay

CODEE HADDII AADAN HADDA U XIRNAYN XUKUN DEMBI CULUS; IYO
Haddii lagugu xukumay dembi culus, waad codayn kartaa haddii aadan hadda u xirnayn dembiga culus.

IN AAD CODAYSID HADDII AAD WALI KAA MAS'UUL AH HOOS JOOGTID
Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad wali kaa mas'uul ah hoos joogtid, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

IN AAD CODAYSID ADIGA OO AAN CODKAAGA CIDI SAAMAYN KU YEELAN
Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid adiga oo aan cid joogta goobta codayntu wax saamayn ah ku yeelan codkaaga.

IN LAGUU BEDDELO WARQADDA CODBIXINTA
Waxaad xaq u leedahay in lagu beddelo warqadda codbixinta haddii aad qalad ku samaysay warqadda codbixinta in taadan sanduukha ku ridin.

IN AAD CABASHO GUDBISO
Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho qoraal ah u gudbiso goobtaada codbixinta haddii aadan ku faraxsanayn qaabka doorashada loo maamulayo.

IN AAD WADATID TUSAALE AH WARQADDA DOORASHADA
Waxaad xaq u leedahay in aad tusaale ah warqadda codbixinta la gashid waabta codbixinta.

IN AAD WADATID XEERKA XUQUUQDA CODBIXIYAHA
Waxaad xaq u leedahay in aad nuqul ah Xeerka Xuquuqda Codbixiyaha la gashid waabta codbixinta.

